

CADAALADDA GURYAHA EE DADKA NAAFADA AH



Sharciga ayay ka soo horjeedaa in mulkiilayaashu kala takoorid kugu sameeyaan haddii aad naafo tahay ama haddii aad leedahay saaxiibo ama qoys naafo ah.

SIDEE DADKA NAAFADA AH LOO DHOWRAA?

- Mulkiilayaasha looma ogola in ay waydiiyaan in qofka arjiga codsanaya ama ijaaranaya uu yahay qof naafo ah ama xanuun qaba, ama in ay waydiiyaan macmuulaad ku saabsan khatarta ay sugan yihiin ilaa inta ay le'eg tahay, ama in ay arkaan diiwaannada caafimaad.
- Ka dib marka lasoo dego, qofka naafada ah wuxuu xaq u leeyahay in uu mulkiilaha ka codsado in uu isbeddelada saxda ah ku sameeyo sharciga, nidaamyada ama adeegyada si uu ugu fududeeyo inay isticmaalaan guriga.
- Mulkiilayaashu waa in ay qofka naadafada ah u ogolaadaan in uu isbeddelada saxda ah ku sameeyo guriga ay ku nool yihiin iyagoo kharashka iska bixinaya. Haddii mulkiiluhu uu dhaqaale ka helo federaalka, isagu/iyadu waxaa suuragal ah in uu bixiyo/bixiso isbeddelka la samaynayo.
- Guryaha loogu tala galay qoysaska badan ee la dhisay 1991-kii ka dib, waa in ay buuxiyaan shuruudaha ay dawladdu uga baahan tahay si ay uga dhigaan kuwo ay geli karaan dadka naafada ahi.

GUDDIGA CADAALADDA GURYAHA OREGON WAXAY HALKAN U JOOGAAN INAY WAX CAAWIYAAN!

Haddii aad u malaynayso in kala takoorid lagugu sameeyay, ama aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada, waxaad wacdaa khadkayaga **1-800-424-3247**, sii gudbinta 2, ama booqo website-kayaga **www.fhco.org**.

Tusaalooyinka hoyga saxda ah:

- Lahaanshaha xayawaan ku caawiya xataa haddii uu jiro sharci ku saabsan in aan xawayaan lagu haysan karin guriyaha.
- Aan la bixinaynin lacag la iska sii dhigo ama kharashka loogu tala galay xawayaanka wax caawinaya.
- Ogolaanshaha daryeele guriga ku nool oo aan ahayn qofka ijaartay.
- Siinta goob gaariga la dhigto oo la qoondeeyay oo u dhow guriga.

Tusaalooyinka waxka beddelka saxda ah:

- Beddelaada meesha furaha la geliyo ee albaabka oo ay la socoto meesha laga furo.
- Balaarinta halka albaabka laga galo si kursiga curyaanka (wheelchair) loogu isticmaalo.
- Ku darida meel kursiga curyaanku (wheelchair) mari karo oo albaabka aadaya.
- U samaynta bir la qabsan karo oo ku taala musqusha.

Maxaad samayn kartaa?

- Kaydi diiwaannada dhamaan warqadaha – fariimaha, ogaysiisyada, shatiyada, fariimaha telefoonka, qandaraasyada, warqadaha, iwm.
- Sawir ka qaad dhibaataada jirta haddii aad karto.
- Hel magacyada iyo lambarada dadka ku lug yeeshay.
- Hel lambarada – taariikhda ay wax dhaceen, cinwaanka halka ay ka dhacday, iyo kharashka.
- La hadal deriska – ayaa kale ee ay tani ku dhacaysaa? Yaa arkay markii ay dhacaysay?



Golaha Cadaaladda Guryaha Oregon (FHCO) waa hay'ad aan faa'iido doon ahayn, waa hay'ad aan dawli ahayn oo xuquuqda bulshada u qaabilsan oo u adeegaysa Oregon.



Shaqada bixisay aasaaska daabacaadani waxaa lagu taageeray dhaqaale lacag laga helay Wasaarada Guryaha iyo Horumarinta Magaalada. Waxyaalaha ay ka kooban tahay iyo waxyaalaha lagu ogaaday shaqada waxaa loogu tala galay dadweynaha. Qoraaga iyo daabacaha ayaa si gaar ah uga mas'uul ah sax ahaanshaha warbixinnada iyo sharaxaadaha ay ka kooban tahay daabacaadani. Sharaxaadahan oo kale kama turjumayaan aragtida rasmiga ah ee Dawladda Federaalka ah.

Adeegyadan oo qaab kale u qoran iyo turjumaad ayaa la helayaa.